

Tallaabooyinka Boolisku Sameey karaan:

Qofka Rabshada sameeyey oo laga raro Guriga.

Ama Xabsiga la dhigo.

Ama Dacwad lagu qaado haddii uu geeysto Dhibaato jireed ama Qasab, Kufsiga iyo Dembiyada la mid ka ah.

Telefoonnada Muhiimka ah ee aad la xiriiri karto.

Haddaba haddii aad la kulanto dhibaato lambarradan hoos ku qoran waa muhiim ee wac

Emergeny 112 ama Boliiska 110.

Sidoo kale wac Guryaha loogu talo galay Xaasaska la dhibaateeyo. Telefoon 03334360222

Waxa kale oo aad wici kartaa Urur Gar-gaarka bixiyo Tel.03334 299433.

Sidaa si la mid ah waxaad wici kartaa Hay'adda caawiso Haweenka la dhibaateeyo Tell.08000116016

Dhibaatadu ma aha mid Qaddar ah ama wax lagu qoray. Sidaas darteed waa inaad is difaacdo.

In lagu dhibaateeyo Adiga iyo Carruurtaadu ma aha wax la aqbalin karo. Waana Fal-dembiyeed.

Haddaba ha u dulqaadanin Nooc kasta oo Fal-dembiyeed ah, hana oggolaanin in Carruurtaada iyo Adigaba la idin dhibo.

Ha aqbalin in lagu hanjabo

Ha aqbalin in lagu cadaadiyo

Ha aqbalin in lagu cabsi geliyo si toos ah ama Telefoon ah.

Gar-gaarka koobaad ee ka hortagga Rabshadaha.

Haddii aad la kulanto dhibaato la xiriir Boliiska oo wac lambarka deg-degga ee Boliiska oo ah 110.

